

# Arjiga/Codsiga Oregon Lifeline (Qiimo-dhimis)

[www.lifeline.oregon.gov](http://www.lifeline.oregon.gov)

**Komishinka Adeegyada  
Dadweynaha ee Oregon**  
PO Box 1088, Salem, OR 97308-1088  
Isniinta - Jimcada, 9 am ilaa 4 pm  
800-848-4442  
TTY: 800-648-3458  
Taleefanka muuqaalka: 971-239-5845  
Fakiska: 877-567-1977  
[puc.rspf@puc.oregon.gov](mailto:puc.rspf@puc.oregon.gov)

Oregon Lifeline (Kaalmada Noloshaha ee Oregon) waa barmaamij dowladeed oo heer federaal iyo heer gobol ah kaas oo qiimo dhimis bille ah ku bixiya adeegga taleefanada (illaa \$15.25) ama adeegga internetka xawaaraha badan (illaa \$19.25) waxaana loogu talagalay qoysaska danyarta ah ee u qalma qiima-dhimista kuwaas oo adeeg bixiyaashooda ay ka qeybqaadanayaan barnaamijka (liiskooda hoos ka fiiri). Cadadka qiima dhimista waa la beddeli karaa.

QAYBTA



**Fadlan na sii xogtaada oo buuxi qaybaha A, B, C ama D, iyo E.**

\*Godadka loo baahan yahay

\* Magaca sharciga ah ee codsadaha (Magaca Koowaad, Xarafka koowaad ee magaca labaad, Magaca Ugu danbeeya) (Magaca sharciga ah ee codsadaha waa inuu ku qoran yahay biilka/koontada)

\_\_\_\_\_  
\*Lambarka Sooshiyaal Sekuuritigga      Cinwaanka limeelka      \*Taariikhda dhalashada

\*Lambarka koontada (*tobanka xaraf ee ugu hoseeya*) **ama** lambarka taleefanka ee qiimo dhimista Lifeline

\_\_\_\_\_  
Lambarka taleefanka ee kale (Haddii uu ka duwan lambarka taleefanka ee qiimo dhimiska Lifeline)      Guriga      Taleefanka gacanta

\_\_\_\_\_  
\*Cinwaanka limeelka      Lambarka guriga      \*Magaallada      \*Koodhka boostada

Cinwaanku ma yahay mid ku meel gaar ah?      **Halkaan calaamadeey haddii aad ku nooshahay  
Dhulalka Qabiilada.**

\_\_\_\_\_  
Cinwaanka boostada (hadduu ka duwan yahay kan kor ku qoran)      Lambarka guriga      Magaallada      Koodhka boostada

**Fadlan ku soco bogga xiga.**



**AT&T Mobility**

*(Fadlan wac 1-800-377-9450 ama adeegso [Aalada Raadinta Koodhka Boostada](#) si aad u ogaato haddii ay bixiyaan qiimo dhimista Oregon Lifeline ee adeegaaga taleefanka ee meesha aad ku nooshahay.)*

Asotin

Beacon Broadband

Beaver Creek

**CenturyLink**

Clear Creek

Colton

DirectLink

**Douglas Fast Net**

Eagle

E4 Connect

Gervais/DataVision

Helix

Hood River Electric & Internet Co-op

Home

Hunter Communications  
*(Fadlan wac 541-772-9282 si aad u ogaato haddii Hunter Communications ay bixiso qiimo dhimista Lifeline ee meesha aad ku nooshahay.)*

HYAK

MINET/WVF

Molalla Communications

Monitor

Monroe

Nehalem

North State

Oregon Tel. Corp.

PTC

Peak Internet

Pine Telephone

Pioneer

Reliance Connects

Roome Tel. Com.

SCTC

Scio Mutual

Snake River PCS

Spectrum  
*(Fadlan wac 1-800-941-7809 si aad u ogaato haddii Spectrum ay bixiso qiimo dhimista Lifeline ee meesha aad ku nooshahay.)*

St. Paul

US Cellular

**Viasat** *(Fadlan wac 1-855-851-7419 tsi aad u ogaato haddii Viasat ay bixiso qiimo dhimista Lifeline ee meesha aad ku nooshahay.)*

**Warm Springs**

**Zipty Fiber**

***Adeeg bixiyaasha magacoodu ku qoran yahay farta waawayn ayaa sidoo kale ka qaybqaata adeegga Tribal Lifeline oo bixiya qiimo dhimis dheeri ah oo dhan ilaa \$25.00.***

**Fadlan ku soco bogga xiga.**



## U qalmitaanka ku saleysan barnaamijka.

Calaamadeey barnaamijka aad adiga ama xubnaha qoyskaagu hadda ka diiwaan gashan tihiin:

### Ma jiraan wax dukumiinti ah oo lagaa rabo:

Supplemental Nutrition Assistance Program  
(Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Nafaqada)  
Medicaid

### Keen Caddaynta:

Supplemental Security Income  
(SSI, Kaalmada Sugidda Dakhliga)  
Abaal Dhurka Ciidanka Hawlgabka ah ama Dadka Ka Soo Badbaadey  
Caawimaada Guriyaynta Dadwaynaha ee Federaalka (Qaybta 8)

### Barnaamijyada Gaarka u ah Qabiilada Keen Caddaynta:

Caawimaada Guud ee Bureau of Indian Affairs (BIA, Laanta Arimaha Hindida)  
Tribal Temporary Assistance for Needy Families (Caawimaada Qabiilka ee Ku meel Gaarka ah ee Loogu Talagalay Dadka Danyarta ah (TANF ka qabiilka)  
Food Distribution Program on Indian Reservations (FDPIR, Barnaamijka Cunto Qaybinta ee Hida-Dhawrka Hindida)  
Tribal Head Start (Head Start-ka Qabiilka) (kaliya qoysaska buuxiya heerka u qalmitaanka dakhliga.)

**Buuxi Qaybta D haddii aadan u qalmin wax ka mid ah barnaamijyada ku jira Qaybta C.**



## U qalmitaanka ku saleysan dakhliga.

Calaamadeey Tirada Qoyskaaga. Si aad ugu qalanto, Dakhliga Sanadlaha ah ee Qoyskaaga waa inuusan ka badan heerka lagu sheegay godka ku xiga Tirada Qoyskaaga. Qoys waxaa laga wadaa shaqsi ama koox shaqsiyaad ah oo ku wada nool isku guri wadaagana dakhliga iyo kharashaadka. Caddeynta dakhliga waa in lagu soo daraa codsigaaga.

| Tirada Qoyska | Dakhliga Guud ee Sanadlaha a | Tirada Qoyska | Dakhliga Guud ee Sanadlaha a | Tirada Qoyska | Dakhliga Guud ee Sanadlaha a |
|---------------|------------------------------|---------------|------------------------------|---------------|------------------------------|
| 1             | \$20,331                     | 3             | \$34,857                     | 5             | \$49,383                     |
| 2             | \$27,594                     | 4             | \$42,120                     | 6             | \$56,646                     |

Qof kasta oo dheeri ah ku ah tirada qoyskaaga, ugu dar \$7,263.

### Keen hal ama labo ka mid ah dukumiintiyada soo socda oo caddeyn u ah dakhligaaga:

*(Keen keliya nuqullo – orjinaalka laguuma soo celin doono)*

- Canshuur celinta Federaalka ama Gobalka ee sanadlaha hore
- Bayaanka dakhliga sanadkaan ee ka soo baxay cida aad u shaqeyso.
- Risiidyada mushaarka ee sadex bilood oo xiriir ah oo ka mid ah 12 bilood ee la soo dhaafay
- Bayaanka gunnooyinka maamulka ciidanka hawlgabka ah
- Bayaanka gunnooyinka Shaqo La'aanta ama Magdhawga Shaqaalaha
- Bayaanka gunnooyinka Sooshiyaal Sekuuritigga
- Bayaanka gunnooyinka Hawlgabka ama Abaal-Dhurka
- Caddeynta Furiinka ama dukumiintiga Masruufka Ilmaha oo ay ku qoran tahay xogta dakhliga



## Aqbalaada. (Waa inaad saxiixdaa jumlad kasta.)

Waxaan aqbalayaa, anigoo og ciqaabta iiga imaan karta haddii aan ka been sheego, bayaannada soo socda:

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in haddii la ii aqoonsado inaan u qalmo, inay qaadan karto 30 ilaa 60 maalmood in adeeg bixiyahayga uu qiimo dhimista Oregon Lifeline ku dabaqo koontadeyda.

Saxiix

Waxaan Oregon Public Utility Commission (PUC, Komishinka Adeegyada Dadweynaha ee Oregon), Federal Communication Commission (Komishinka Isgaarsiinta ee Federaalka), iyo Universal Service Administrative Company (Shirkada Maamulka Adeegyada Guud) siinayaa awood ay ku uruurshaan ama dib u eegis ugu sameeyaan diiwaanno kasta oo loo baahan yahay si loo xaqiijiyo bayaanadeyda laguna xaqiijinaayo inaan u qalmo gunnada Oregon Lifeline. Waxaan sidoo kale u fasaxayaa adeeg bixiyahayga inuu faafiyo diiwaanno kasta oo loogu baahan yahay gunadayda Oregon Lifeline.

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in qoyskaygu keliya heli doono hal gunno oo gunnada Lifeline ah.

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in haddii aan jebiyo ama ku xadgudbo xeerka halka gunno ee qoyskiiba, in la iga saari doono barnaamijka Oregon Lifeline.

Saxiix

Waxaan aqbalayaa inaan ku wargeliyo PUC 30 maalmood gudahood haddii:

- Aan guuro.
- Aan iska jaro adeegga.
- Aanan u qalmin gunnada Oregon Lifeline.
- Aan helo wax ka badan hal gunno oo gunnada Oregon Lifeline ah.
- Xubin kale oo qoyskayga ah uu sidoo kale qaato gunnada Oregon Lifeline.

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in gunnada Oregon Lifeline aan loo wareejin karin ama la siin karin qof kale.

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in la iga dooni karo inaan mar kale xaqiijiyo u qalmitaankayga sii socota ee gunnada Oregon Lifeline xili kasta iyo in, haddii aanan u hoggaansamin, gunadayda Oregon Lifeline la iga joojin doono.

Saxiix

Waxaan fahamsanahay in Oregon Lifeline ay tahay gunno uu bixiyaan gobalka iyo federaalka iyo in samaynta warbixin ula kac ah oo been abuur ah ama keeninta dukumiintiyada been ah ama faalso ah si aan u helo gunnada aan ciqaab sharci ah ku muteysan doono ayna keenayso ganaaxyo, xabsi geyn, in la iga mamnuuco barnaamijka ama in gebi ahaanba la iga saaro barnaamijka.

**Dhammaan bayaannada aan ku sheegay codsigaan waa run waana sax ilaa intaan ogahay.**

\_\_\_\_\_  
\*Saxiixa qalinka ah ama oonlaynka ah ee codsadaha

\_\_\_\_\_  
\*Taariikhda